

From: [Washington State Department of Early Learning](#)
Subject: ATTN Home Providers: Minimum Education Requirement
Date: Thursday, September 29, 2016 2:03 PM

This bulletin was sent to the following groups of people: Subscribers of Minimum Education Requirements Somali (136 recipients)

Gacaliye Bixiyaha Waxbarashada Hore Guriga Qoyska,

Dhammaan bixiyayaasha shatiga Daryeelka Caruurta ee Guriga Qoyska ee Washington waa inay soo buuxiyaan shuruudaha waxbarashada ugu yar ee gobolka ilaa iyo Maarso 31, 2017. Halkaan waxaa ku yaal waxyaabaha aad u baahan tahay si aad u soo buuxiso shuruudda shatiga:

Doorashooyinka Waxbarashada

Haddii aad shatiga qaadatay kahor Maarso 31, 2012, waa inaad buuxisa *mid* ka mid ah doorashooyinka waxbarasho ee hoos ku qoran kahor Maarso 31, 2017:

- Shahaadada Hore (Shahaadada ugu horreysa kuwa la doonayo)
- Shahaadada Horumarinta Carruurta (CDA) Aqoonsiga (waa inuu noqda mid hadda ah, oo aan dhacin)
- Shahaadada Horumarka Waxbarashada Guud (GED)
- Laba iyo toban sanadood oo waxbarashada dugsiyada hoose iyo sare
- Afartan iyo shan dhibcaha waxbarashada sare ah (45 dhibcaha kuliyaadda)
- Lagugu qiimeeyay heerka 3aad ee Early Achievers

Si aad u akhriso qoraalka rasmiga ah ee WAC 170-296A-1725, booqo website-ka sharci dejiyayaasha gobolka ee (<http://apps.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=170-296A-1725>).

Bixinta Caddeynta Waxbarashada

Marka aad dhammaystirto doorashada waxbarasho ee kor ku xusan, buuxi Codsiga Waxbarashada ee [MERIT](#). Raac [Shanta Talaabo ee Sahlan](#), [gudbinta Waxbarashadaada \(tilmaamaha\)](#), ama [soo gudbinta waxbarashadaada \(video\)](#) wixii caawimaad ah.

Haddii aad hore u dhammaystirtay Codsiga Waxbarashada ee MERIT, bixisay waraaqaha layska rabo oo aanad ku arkin diiwaanka MERIT xirfadaada, kala xiriir MERIT@del.wa.gov.

Waxbarashada	Dokumeentiga La iska Doonayo	Sida lagu bixiyo cadeeynta dhammaystiray
	Nuqulka Qoraalka Minguursan ee rasmiga	Buuxi Codsiga Waxbarashada ee kMERIT, kadib Talaabooyinka

<ul style="list-style-type: none"> • Shahaadada Hore (Shahaadada ugu horeysa kuwa la doonayo) • Laba iyo toban sanadood oo waxbarashada dugsiyada hoose iyo sare • Afartan iyo shan dhibcaha waxbarashada sare ah (45 dhibcaha kuliyadda) 	<p>ah, xaga hore iyo dambe</p>	<p>Shan ee Sahlan.</p>
<ul style="list-style-type: none"> • Soo buuxi Imtixaanka Shahaadada Horumarka Waxbarashada Guud (GED) • Shahaadada Horumarinta Carruurta (CDA) Aqoonsiga (waa inuu noqda mid hadda ah, oo aan dhacin) 	<p>Nuqulka shahaadada</p>	

<ul style="list-style-type: none"> • Lagugu qiimeeyay heerka 3aad ee Early Achievers • Hubi in qiimayntaada Early Achievers la dhammaystiray ama ay noqon doonto mid dhammaystiran ilaa iyo Maarso 2017 si aad u hesho doorashadaan. 	<p>Wax dokumeenti ah looma baahna</p>	<p>Wax ficil ah lagama doonayo haddii lagugu qiimeeyay Heerka 3. Haddii aadan weli gaarin Heerka 3 taariikhda maalinta ugu dambeysa ee la soo codsan karo qiimeynta Early Achievers ee Maarso 2017 waa Oktoobar 1, 2016.</p>
--	---------------------------------------	--

Sidee ayaan ku heli kara waxbarashada aan u baahannahay si aan u soo buuxiyo sharuudaha loo baahan yahay?

Go'aanso doorashada waxbarasho ee kugu haboon kuwa kor ku qoran. Haddii aadan hubin, DEL waxay kugu dhiirigelinaysa inaad tixgeliso qaadashada shahaadada bilowga ah ee waxbarashada hore ee carruurnimada Si aad u buuxiso shahaadada bilowga ah, waa in aad iska diiwaangeliso koorsooyinka deyrta oo ka bilooban doona Sebtember Kulliyadda bulshada. Tani waxay hubinaysaa in aad dhameystirto ilaa iyo Maarso 31, 2017. Halkan waxaa ku qoran [liiska dhammaan kulliyadaha bixiya](#) Shahaadada bilowga ah. Kulliyadaha sidoo kale waxay kaa caawin kara inaad buuxiso GED iyo kulliyadaha qaar ka mid ah waxay bixiyaan koorsooyinka Shahaadada Horumarka Carruurta (Child Development Associate) (CDA).

Waa maxay deeqaha waxbarasho ee aan heli karo?

- Fursadaha Deeqaha waxbarashada Early Achievers ayaa laga heli karaa iyada oo loo marayo kulliyaddaha gobolka oo dhan.
- Kulliyadaha waxay ku siin karaan macluumaad ku saabsan fursadaha lacagaha dheeraadka ah ee laga yaabo in la heli karo.
- U sheeg inaad tahay bixiyaha daryeelka carruurta guriga qoyska iyo weydiiso waxyaabaha ku saabsan lacagaha deeq bixiyayaasha daryeelka carruurta qoyska.

Ma la ogol yahay ka Reebanaanta Sharciga?

Waxaad codsan kartaa ka Reebanaanta Sharciga adigo raacaya tallaabooyinka ku xusan [WAC 170-296A-1625](#). Maxaa yeelay, waxaa weli jira waqti aad ku soo buuxiso shuruudda waxbarashada, Ka Reebanaanta Sharciga lama sameeyn doono isla markiiba. Waxaan aadka kugu dhiirinaynaa in aad buuxiso shuruudda waxbarashada; Ka reebanaanta Sharciga WAC ma damaanad qaadayso in ka reebanaanta lagu siin doono.

Weli waxaan qabaa su'aalo, yaan la xiriirayaa?

Sarkaalka Shatiga: <http://www.del.wa.gov/about/contact.aspx>

Caawinaada MERIT:

Email: merit@del.wa.gov

Telefoonka 1.866.482.4325 iyo dooro lambar 5



Questions?
[Contact Us](#)

STAY CONNECTED:



Update your subscriptions, modify your password or email address, or stop subscriptions at any time on your [Subscriber Preferences Page](#). You will need to use your email address to log in. If you have questions or problems with the subscription service, please contact subscriberhelp.govdelivery.com.

This service is provided to you at no charge by [Washington State Department of Early Learning](#).